FRASER
Special needs ★ Bright futures®

OGGOLAANSHAHA DAAWAYNTA DARYEEL-CAAFIMAADKA/U XILSAARKA DHEEFAHA

Magac Macmiil (Fadlan Daabac) | Taariikh Dhalasho Macmiil

Magaca Mas'uulka(iyiinta) Sharciga Ah (Fadlan Daabac)

Fadlan weyddii su'aalo haddii aadan fahmin midkoodna qaybahan soo socda.

U OGGOLAANSHAHA

Oggolaanta Daawaynta

Waxaan u oggolahay daryeelka caafimaadka ay siiso Fraser macmiilka magaciisu(eedu) kor ku qoran yahay, oo ay ka mid noqon karaan habraacyada baaritaanka caadiga ah iyo hawlo caafimaadka kale ee uu daryeelahaaga caafimaad ama shaqaalaha caafimaad ee Fraser ee kale ay garteen inay lagama maarmaan tahay. Waxa dhici karta in la ii soo fidiyo adeegyo caafimaad ay ku lug leeyihiin ku bixinta daryeelka caafimaadka nidaamyada durugsan iyada oo la adeegsanayo qaab wada xiriir elektaroonig oo lala yeesho adeeg bixiye jooga goob kale, oo waxaa oggolahay adeegyadaas oo kale. Waan ogahay inuusan daryeelka-caafimaadku ahayn saynis mar kasta sax ah oo waxaan anigu qirayaa inaysan jirin wax dammaanad oo la iiga qaaday arrimaha ku saabsan baaritaannada ama daawaynta aan ka helo Fraser.

Anigu waan fahmay in:

- Aan lagu samayn doonin habraacyo laxaad leh macmiilka ilaa macaamilku ama dadka ka mas'uulka ah qofku ay u helaan fursad ay si buuxda ugala hadlaan xirfadlaha daawaynaya ama hawl-yaqaan caafimaad kale. Xaaladaha deg degga ah ayaa noqon kara kuwo ka reebban taas. Macmiil kasta ama cid kasta oo ka mas'uul ah ayaa xaq u leh inay oggolaadaan, ama diidaan, wixii kasta ee ah habraac ama daawayn la soo jeediyay.

Oggolaanshaha Siidaynta Macluumaadka Caafimaadka

Waan fahamsanahay in diiwaannadani lagu hoos ilaaliyo sharciyada gobolka Minnesota iyo xeerarka HIPAA. Lama shaacbixin karo iyada oo aan la iga haysan oggolaansho qoraal ah haddii si kale aanu sharcigu u sheegin mooye. Waxaan u oggolaanayaa Fraser inay ugu siidayso macluumaadka caafimaadka sida loogu baahdo:

- Dhammaan kharash bixiyeyaashu si ay u habsocodsiiyaan sheegashooyinka daryeelka caafimaadka;
- Qofka (dadka) loo idmaday inay noqdaan Biil ku Dallacayga/ Dammaanad-qaadaha si uu wax uga qabto biilasha, bixinta, iyo caynsanaantayda daryeelka caafimaad ee koontadayda;
- Ururka aqoonsiga iyo tayada, hay'adaha sharci ku lug leh, wakaaladaha ka warbixiya caafimaadka dadwaynaha, ama dadka ama qolooyinka kale ee ku lug leh hawlaha daryeelka caafimaadka;
- Bixiyeyaashayda kale ee daryeelka caafimaad markay tahay daawaynta ama ujeeddooyinka bixinta; iyo
- Qolooyinka Fraser markay tahay ujeeddada bixinta macluumaad ku saabsan adeegyada Fraser oo laga yaabo kuwo aniga danahayga ah.

Waan fahamsanahay in, haddii macluumaadkan loo shaacbixiyo dhinac saddexaad, macluumaadka laga yaabo inayna waxa intaa ka dambeeya ku difaacneyn xeerarka asturnaanta federaalka oo laga yaabo in dib u sii shaacbixiyaan qofka ama hay'adda heleysa macluumaadka.

Waxaan fahamsanahay in tani hirgashanaan doonto illaa muddo hal (1) sano ah waxa ka dambeeya taariikhda saxiixa. Anigu waxaan dib ugula soo noqon karaa ama wax kaga beddeli karaa dukumentigan kaliya aniga oo siiya ogeysiis qoran Maamulka Macluumaadka Caafimaadka Fraser.

BAYAANKA MAS'UULIYADDA LACAGEED

Oggolaanta loogu talagalay Bixinta

Waxaan qirayaa inaan mas'uul ka ahay dhammaan ku dallacyada adeegyada la ii fidiyo, oo ay ku jiraan qaddar kasta oo ayna bixin qorshahayga(yaashayda) daryeelka caafimaadku, ka sokow shuruudaha biilasha iyo xaddidyada hoos yimaad barnaamij dawlad. Waxaan u oggolaanayaa Fraser in uu ku dabaqo naqid baaqi kasta oo ah koontadayda wixii kasta ee aniga ay igu leeyihiin hal ama in ka badan qolooyinka Fraser. Waxaan ku raacsanahay inay Fraser laga yaabo heli karto macluumaadka lacageed si loo go'aamiyo u-qalmitaanka gargaarka lacageed iyo/ama fursadaha lacag bixinta. Macluumaadka kaalmada lacageed waxa laga heli karaa adiga oo waca 612-767-7222.

Waxaan u oggolahay shirkaddayda(dahayga) caymisku inay si toos ah u siiso Fraser kharashka daawayntayda. Waxaan ku raacsanahay, oo aan fahamsanahay:

- Inaan Fraser si buuxda oo sax ah ugu siiyo macluumaadka ku saabsan caynsanaantayda caymiska daryeelka caafimaadka.
- Inaan anigu masuul ka ahay ogaanta dheefaha ku caynsan qorshahayga caafimaad ee gaarka ah.
- In haddii Fraser ay ka warhesho inay jiraan caymis caafimaad kale oo arrinta khuseeya, Fraser ayaa u habsocodsiin doonta sheegashooyinka sidooda habboon.
- La-biximaha iyo jar-jaritaannada ayaa ah in la bixiyo waqtiga adeegga.

FRASER
Special needs ★ Bright futures®

OGGOLAANSHAHA DAAWAYNTA DARYEEL-CAAFIMAADKA/U XILSAARKA DHEEFAHA

Magac Macmiil (Fadlan Daabac) | Taariikh Dhalasho Macmiil

Magaca Mas'uulka(iyiinta) Sharciga Ah (Fadlan Daabac)

Haddii aan ahay qaate Medicare, waxaan codsanayaa in loogu bixiyo dheefaha Medicare ee la oggolaaday magacayga aniga ama Fraser wixii kasta ee ah adeegyada la bixiyay. Haddii qorshahayga(yaashayda) daryeelka caafimaadku aanu u oggolaan doonin bixinta tooska ah Fraser ama haddii ay Fraser doorbiddo inaysan aqbalin u xilsaarka dheefaha caafimaadka, waxaan oggolahay inaan siiyo Fraser dhammaan lacagaha daryeelka caafimaadka ee aan ku helayo adeegyada.

Waxaan fahamsanahay in la iiga baahan yahay inaan ogeysiiyo Fraser haddii ay jiraan isbeddelo ku dhacay caymiskayga daryeelka caafimaad, ama isbeddel xagga sharciga ah oo saamayn ku yeelan doona samahayga/samaha ilmahayga. Intaa waxa u dheer, waxaan fahamsanahay inay Fraser u baahan karto inay xaqiijiso ka mas'uul ahaanta sharci ee macmiilka iyada oo loo marayo caddayn dukumenti ah.

Waxaan oggolaaday inay Fraser u siidayso macluumaad kasta ha noqotee ee laga hayo diiwaanka caafimaadka macaamilka kor ku magacaaban Kaalmada Caafimaadka, bixiyeyaasha kale ee dawladeed, shirkadaha ama qorsheyaasha caymiska caafimaadka gaarka loo leeyahay, ama ururrada aniga magacayga ku hadlaya, kolba sida loogu baahdo si loo go'aamiyo dheefaha iyo habsocodka sheegashooyinka.

Tababbarteyaasha Caafimaadka

Waxaan qirayaa oon oggolaanayaa in aniga/ilmahaygu laga yaabo ay daweeyaan kuwo ka tirsan Fraser oo ah tababbartayaal caafimaad oo raadsanaya sharciyayn ama ruqsad qaadasho. Adeegyada xaaladdan oo kale ayaa lagu bixin doonaa hoosteeda kormeerka kormeere liisan leh oo arrinta lagu hagaajiyay. Waxaan fahamsanahay in adeegyada loogu soo dallaco saami isku mid ah markay yihiin bixiyaha/kormeeraha sharciyeysan.

QIRASHADA HELITAANKA OGEYSIISKA DHAQANNADA ASTURNAANTA HIPAA

Waxaan halkan ku qirayaa in nuqul ka mid ah Ogeysiiska Ku-Dhaqanka Asturnaanta ee Fraser (“Ogeysiiska”) aniga la iigu diyaariyay inaan heli karo:

- Ogaysiisku wuxuu si ka sii faahfaahsan u sharxayaa siduu Fraser u isticmaali karo una wadaagi karo macluumaadka caafimaadkayga/ilmahayga markay yihiin wixii kale ee aan ahayn daawaynta, lacag bixinta, iyo hawlaha daryeel caafimaad.
- Fraser ayaa walibana u isticmaali doonta oo una wadaagi doonta macluumaadka caafimaadkeyga siduu sharcigu u baahanyahay/fasaxayo.
- Waxa la ii siiyay fursad aan ku weyddiiyo su'aalo kasta oo aan ka qabo ogaysiiskan.

U ISTICMAALKA DIIWAANKA CAAFIMAADKA CILMIBAARISTA

Cilmi-baarista ayaa u horseedda siyaabo cusub iyo siyaabo ka fiican sidii hore oo lagu ogaado laguna daaweeyo xaaladaha caafimaad. Horumarka ayaa ku xiran cilmibaarista iyada oo la isticmaalayo diiwaannada daryeelka caafimaadka. Haddii aan u oggolaado u isticmaalka macluumaadkayga/kuwa ilmahayga cilmibaarista, waa in loola dhaqmaa sida ay farayaan sharciyada gobolka iyo federaalku. Tusaale ahaan, qofkaan anigu ahay/ilmahaygu yahay in la garto ayaa laga ilaalin doonaa natiijooyinka cilmibaarista la daabaco. Haddii aanan oggolaan in macluumaadkeyga loo habeeyay si aan aniga la igu garan, saameyn kuma lahaan doonto kartida aan u leeyahay inaan ka qaybqaato adeegyada la helo marka la joogo Fraser. Haddii aan doorbidayo in aanan ka qaybgalin, waxaan u sheegi karaa xubin ka mid ah shaqaalaha Fraser marka la i qorayo goobta ama iyada oo aan u maro maamulka macluumaadka caafimaadka in aanan rabin in xogta aan qofka la garin karin ee aniga/ilmahayga nagu saabsan lagu darin cilmibaarista.

Aniga oo saxiixa, ayaan qirayaa inaan siiyay oggolaanshahayga Fraser si ay u bixiyaan daawayn. Waxaan ku raacsanahay inaan fahmay oo aan aqbalayaa shuruudaha ku dul yaal foomkan. Waxaan fahamsanahay in aan xaq u leeyahay inaan ka noqdo oggolaanshaha foomkan ku yaal mar kasta ha noqotee aniga oo ku ogeysiiya Maamulka Macluumaadka Caafimaadka Fraser qoraal ahaan.

Saxiix Macmiil | Taariikhda

Saxiixa wakiilka macmiilka | Taariikhda

DAABAC magaca wakiilka macmiilka (hadday khusayso) | Xiriirka/wax-isku-ahaanta